

SOMALI VOICE OF NEW ERA, PROGRAM NO 1061

THRU THE BIBLE SERIES

THE BOOK OF AMOS CHAPTER 8:3-14.

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay kitaabkii Caamoos oo ahaa nin Ilaah farriin ugu soo dhiibay boqortooyadii woqooyi xilli ay ku baraareen hawlahooda, laakiin haddana ay Ilaah ka dheeraadeen.

Caamoos ma ahayn nin la mid ah culimadii waxbaratay ee wakhtigiisa, wuxuuse ahaa nin uu ka dhex shaqaynayno Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Mar uu la hadlayey Dadka reer binu Israa'iil ayaa nebigu wuxuu iyaga garansiinayaa waxa ku soo socda oo ah in magaalada la burburin doono.

Wuxuuse u sii sheegayaa in dembiyadooda aawadood

Ilaah burburin doono magaalada Beytal. Intiise aan burburku ku dhicin qaranka ayaa waxaa dadkii lagu wargelinayaa inay Ilaah u soo leexdaan si bal wax un uga badbaadaan. Waxyaabaha nebigu kula hadlayo reer binu Israa'iil waa waxyaabo caam ah oo khuseeya qaran waliba.

Wuxuuna leeyahay, sida ku qoran kitaabkii Caamoos 5:14-15, waxaana nebiga uu leeyahay, iyadoo Ruuxa Qoduuska ahi ka dul hadlayo, **"Wanaagga doondoona, sharkase ha doondoona, aad noolaataane, oo sidaasuu Rabbiga ah Ilaaha Ciidammadu idiinla jiri doonaa sidaad u tidhaahdeen. Sharka nebcaada, oo wanaagga jeclaada, oo caddaalad iridda ku sameeya, waayo, waxaa suurtoowda in Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu uu u roonaado kuwa reer Yuusuf ka hadhay."**

SONG: REEL----CUT-----

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxaynu ku jirnay meeriska cutubka 8aad ee kitaabkii nebi Caamoos aayaddiisa labaad, markaasoo nebigu uu lahaa: **"Oo wuxuu igu yidhi, Caamoosow maxad aragtaa? Oo anna waxaan idhi, Waxaan arkaa sambiiil midho bisilu ka buuxaan. Markaasaa Rabbigu wuxuu igu yidhi, Dadkayga Israa'iil dhamaadkoodii baa yimid, oo anigu mar dambe iyaga iska dhaafi maayo."** Haddaba wacdiskii Caamos waa la diiday waxaana Ilaah goostay in xukun saaro reer Binu Israa'iil. Sababtaas aawadeed ayaa Masiixu u diray xertiisa inay dunida Warka Wanaagsan ee Injiilka ku wacdiyaan.

Haddii warka Wanaagsan ee Injiika dadka lagu wacdiyo Insaanka xukun iman maayo, laakiin waxaa la helayaa badbaado daa'iman ah. Haddaba haddii aynu nahay

wacdiyayaasha Masiixa, waa inaynu u guntanna wixii maiixu inaga doonayey, waana inaan ku wacdinno Hadallada Ilaah.

Hadaan caaway horey uga sii soconno halkii aynu habeenkii dhowayd ku dhaafnay meeriska cutubka 8aad ayaannu caaway ka bilaabaynaa aayadda 3aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Maalintaas gabayada macbudku waxay ahaan doonaan baroor, oo waxaa jiri doona meydad badan, oo meel kasta ammusnaan baa loogu tuuri doonaa."

Haddaba halkii Ilaah lagu ammaani jiray waxaa loo baddalayaa meel murgo iyo oohin. Meeshii farxaddana waxaa loo beddelayaa meel dadku ay ku baroortaan. Dadka la laayey ayaa wuxuu ku daadsanaanayaa meel waliba. Waana waxyi dhegaysigiisu aad iyo aad u xanuun badan, oo kuwa maalinta xukunka gaaraana way halligmi doonaan. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubak 8aad, ayaannu haatan idiin akhriyeynaa aayadda 4aa, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

"Bal maqla, kuwiinna saboolka baahan liqow, oo xataa masaakiinta dalka Baabi'iyow."

Wuxuu Ilaah imminka la hadlayaa kuwa masaakiinta sida xun ula macaamilooda ama ula dhaqma. Inkasoo aynu isla arrinkaas horey uga hadalnay, ayaan imminka dareensanahay sida ay u ahmiyad ballaaran tahay inaan isla garanno sida Ilaah u eegayo ama uu uga fikiro masaakiinta dunidan. Waxaan haddaba khibrad u leeyahay ama soo arkay nolosha fakhriga. Aabbahay wuxuu ahaa shaqaale joornaato ku shaqeeya. Markii biilka dukaanka uu bixiyo, markarka qaarkood

shilin uma soo hari jirin. Weliba markii aan afar iyo toban jir ahaa ayaa Aabbahay dhintay, waxaanay taas ugu kalliftay inaan hooyaday iyo walaashayba u xamaalo. Intii aan ku jiray xamaalka hooyaday iyo walaashay, ayaan helay baqa ah inaan Ilaah u adeego. Dabadeedna wax baa lay baray.

Khibradahaas ila soo gudboonaaday ayaan arkay sida loogu baahan yahay in la taageero masaakiinta.

Waxaase beryahan batay dad isku sheegaya inay masaakiin yihiin, ama u adeegaan, laakiin wixii masaakiinta loo soo diro iyaga qudhooda isticmaala. Barnaamijyadaas oo kale waa kuwa ay tahay inaan la taageerin. Qofka masaakiinka ah waxaa lagu taageeraa wax-barasho, laakiin maahan in lacag badan, isagoo aan shaqayn farqaha loogu shubo. Qofka maskiinka ah ee Ilaah caafimaadka siiyey waa inuu noqdaa nin jecel inuu xamaasho. Soomaaliduna waxay tiraahdaa, **"Shaqaa Sharaf leh."**

Waxaase ira kuwo u arka in shaqadu tahay wax reer baadiyayaasha ay iska leeyihiin. Waxay la tahay in ninka reer magaalka ah uu turufo iyo been ku noolaado, laakiin haddii ay shaqadu tahay mid dhib badan ay iska leeyihiin reer baadiyayaasha. Figraddaasina waa mid khaldan, waayo ruuxa banii'aadanka ah haddii uusan shaqaysan, baryootan buu ku dambeeynayaa.

Waxaan xusuustaa buugaagtii af-soomaaliga ee la qoray toddobaataneeyadii, markii hawl iyo hanti-wadaaggu xoogga lahaa. Waxaa sheekooyinkaas mid ka mid ah ku qornaa nin la oran jiray Cali-ma-shaqayste. Ugu dambayntii da' baa ka daba-timid Cali-Ma-Shaqayste.

Maaddaama uu turuufo iyo been haatan lacag ku helaynin, ayaa waxay dani ka geyn weysay inuu tuugsado. Tuugsiguna waa waxa qofka Soomaaliga ah uu aad iyo aad u neceb yahay. Maalintii dambe ayaa nin ay is-garan jireen beryey, maraasaa ninkii gacanta u saaray shilin, oo wuxuu ku yiri Cali-Ma-Shayqayste: **"Walaalow, Jiifkaan jiif baa kaaga horreeyey."**

Haddaan ku soo noqonno meerisa cutubka 8aad ayaannu imminkana dib ugu noqonaynaa aayaddii 4aad, oo waxaannu la akhriyeynaa aayadda 5aad, haddii kale aayadda shanaad kelideed micnaha soo saari mayso. Waxaana qorniinku leeyahay, sidatan:

"Bal maqla, kuwiinna saboolka baahan liqow, oo xataa masaakiinta dalka baabi'iyow, oo leh, Goormuu dayaxa cusubu dhammaan doonaa aan hadhuuhdka iibinnee? Sabtiduse goormay na dhaafaysaa aannu sarreenka soo saarnee, idinkoo miisaanka eefaah yaraynaya, oo miisaanka sheqelkana weynaynaya, kafadahana khiyaano ku beenaynaya."

Waxaan filayaa inaad garateen qaabkii khiyaanada lahaa ee dadka Israa'iil, waa kuwa woqooyiga deggan e. Waxay xadi jireen miisaanka, haddii aad ku tiraahdo Nuskiilo bur ah i sii, waxay ku siinayaan Rubac iyo tumin. Haddii aad dahab wadato, oo aad cunno ku dhaafsanayso ama beddelanaysana waxay kordhinayaan miisaanka si dahabkaagu lacag yar kuugu gooyo. Waxay kaloo dharari jireen maalmaha Sabtida, oo waxay aad u jeclaayeen inay baayac-mushtarkooda ku sii jiraan, oo si aan kala go' lahayn ay lacagta u tabcaan. Waa isla sida kuwa wakhtigeenna ku badan daka, oo dadka ku khiyaameeya

miisaanka, iyo kuwa marka timirta loogu soo dhiibo dadka, suuqyada ka iibiya, oo cunnadii ay ka soo qaadaan qolyaha deeqda bixiya, ka sii iibiya suuqlayda ama ganacsadata.

Waxay baayac-mushtarka keeni jireen macbudka, oo goobaha wax lagu caabudo ayey beec-sharadu ka socon jirtay. Halkaas ayaa proposallada ama qorshayaasha lagu dhici jiray. Miyaanay haddaba wakhtigeennuna la mid ahayn kii waagaas? Weli waxaannu dhegaystayaal horey idiinku sii wadaynaa meeriska kitaabkii Caamos 8:6, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Si aannu masaakiinta lacag ugu iibsanno oo aannu saboolka baahanna laba kabood u siisanno, oo aannu sarreenka xaabkiisa u iibinno?"

Waxyaabihii ay ka fakarayeen ayaa Ilaah u sheegayaa, oo waxay leeyihiin, "Waxaannu iibsanaynaa dadka aan lacagta haysan, oo waxaannu siisanaynaa lacag fara badan." Tusaale ahaan, nin baa cayr noqonaya, markaasuu ilmihii wax uu siiyo waayayaa. Waxaa suuqa jooga nin ka beec-mushtara ilmaha cunnada loo waayey, oo qofkii dhalay ayuu qaar ka mid ah ilmihiisa uga iibsanayaa xoogaa yar oo sareen ah, waa sarreenkii qashirka ahaa laakiin aan ahayn budada iyo saliid iyaduna la mid ah. Haddaba, waxay kaloo ilmaha masaakiinta ah ku iibsanayaan laba kabood oo ay siiyaan waalidkood.

Waxay ahaayeen ma-naxayaal aan damiirkoodu shaqaynaynin, markaa ciqaabtii Ilaah soo diray ayaa iyana naxdin badnayd. Waxaa lagu xukumay magaalada ay ku nool yihiin kun qof in boqol qof loo reebo, oo tan ay boqol qof ku nool yihiinna in toban qof

loo reebo. Dembiyadu way isku jireen ay gelayeen, in masaakiinta laba kabood lagu iibsadana waxay qaby ka ahayd dembiyadii badnaa ee ay gelayeen, taasoo loo ciqaabay. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 8aad, ayaannu dhegaystayaal imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 7aad, waxaana qorniinka goduuska ahi leeyahay sidatan:

"Rabbigu waa ku dhaartay Weynanka reer Yacquub, oo wuxuu yidhi, Sida xaqaaqada ah aniga shuqulladooda midnaba ka illoobi maayo."

Wanaagga reer Yacquubna waxaa horseed u ah Sayid Ciise Masiix. Rabbigu wuxuu ku dhaaranayaa Sayid Ciise Masiix oo weli markaas iyada ah aan soo daahirin ama aan dunida imaan. Haddaba nidir ka sarreeya oo Ilaah glei lahaa ma lahan haddaanu Masiixiisa ku dhaaran. Waxaa markaa Rabbigu raciyey taas oo uu leeyahay,

"Bil-xaqiqa illoobi maayo shuqulkooda. Sidaannu horey ugu aragnay kitaabka, Ilaah illoobi maayo shuqulka mid waliba ee reer Yacquub ah."

Haddaba sidaan horeyba ugu soo aragnay kitaabkan, Ilaah marnaba ma illoobo shuqulladayada. Waxaanan idiin sheegnay in laga hor muuqan doono Masiixa Ilaa sida ku qoran Warqaddii labaad ee rasuul Bawlos u qoray dadka reer Korintos 5:10, waxaana qorniinku leeyahay sidtan:

"Waayo, dhammaanteen waa in laynaga wada muujiyo kursiga xukuumadda ee Masiix hortiiisa, in qof kastaa helo siday ahaaheen waxyaalihii uu jidhka ku falay, ha ahaadeen wanaag ama shar e."

Haddaba wakhtigii nebi Caamoos ayaa dadka reer binu israa'iil ay badsadeen dembiyada loo ciqaabi lahaa

maalinta Carada ee Ilaah. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 8aad ayaannu horey idiin akhriyeynaa aaadda 8aad, waxaana qoran sidatan:

"Tan daraaddeed miyaan dhulku la gariiri doonin, oo mid kasta oo degganuna miyuusan barooran doonin? Haa, oo dhamamaantiis wuxuu u kici donaa sida Webiga, oo wuu rogrogman doonaa, dabadeedna wuxuu u degi doonaa sida Webiga Masar."

Dadka qaarkii ayey la tahay in rogrogmashadaas la sheegay ay tahay dhulgariir waddanka ka dhacay, taasoo nebigu uu inagala hadlay bilowgii kitaabka markaasoo uu lahaa sida ku qoran aayadda laad ee cutubka kowaad oo leh:

"Kuwanu waa erayadii Caamoos oo ka mid ahaa xoolojirkii reer Teqooca iyo wixii uu arkay oo ku saabsanaa dalka Israa'iil wakhtigii uu Cusiyaah dalka Yahuudah boqorka ka ahaa, iyo wakhtigii uu Yaaraabcaam ina Yoo'aash dalka Israa'iil boqorka ka ahaa, muddo laba sannadood ka horraysay dhulgariirkii."

Waxaa kaloo qidcada kore ay ka macne tahay in Ilaah beyaalooyin ku soo ridi doono, waxaanan ku arki doonnaa belaayooyinka iyo masiibooyinka cutubka kan inoogu xiga. Haddaba waxaannu horey u soo barannay haddii Ilaah wax sii sheego, ha ahaado kheyir imanaya ama belaayo imanaysa e, dalkana way saamayn jirtay, oo belaayooyinka soo socdana dhulka reer binu Israa'iil iyo dadkaba way saamay-nayaan.

Haddaba dhulka reer binu Israa'iil weli waxaa saaran ciqaabtii, welina dhulka barako ma leh, waxaana jira waxyiyo looga hadlay in Ilaah soo booqran dhoono reer binu Israa'iil, oo waxaa jiri doona kheyir iyo

barako.

Waxaa kaloo Caamoos uu ka hadlayaa waxyiyo khuseeya, "Maalinta Rabbiga," isla sida kan soo socda sida ku qoran 8:9, waxaana qorniinku leeyahay sdiatan:

"Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Malaintaas waxaan ka dhigi doonaa in qorraxdu hadhkii dhacdo, oo dhulkana maalin cad baan gudcur ka dhigi doonaa."

Waxaa nebigu leeyahay, **"Maalintaas,"** waana maalinta Rabbiga oo nebigu si xirfadaysan dadka ugu sheegayo. Waxaana maaliitnaas iyada ah ay khusaysaa ama saamaynaysaa wakhtia dhibka weynu dunida ka jiro. Maalintu waxay ka bilaabanaysaa habeen, markaa waxaanay ku soo dhammaanaysaa iftiin, iyo caddo buuxda. Caamoos wuxuu ina siinayaa waxyiyo waaweyn oo isku dhex jira oo khuseeya wakhtiga mustaqbalka. Maalinta Rabbiga weli ma iman, oo lama arag iyadoo qorraxdu dhacday duhurkii ilaa iyo maalinka maantay ah. Markii uu qoray waxyigan ayaa nebigu wuxuu waxyinayaa waxyaabo dhici doono mustaqbalka fog. haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska cutubka 8aad, aayadda 10aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Idihiinnana waan u beddeli doonaa tacsii, oo gabayadiinna oo dhanna baroorasho baan u beddeli doonnaa, oo waxaan ka dhigi doonaa in qof kasta joonyad xidho oo madax kastana la xiiro, oo waxaan ka dhigi doonaa sidii baroorasho wiil madi ah loogu barooro, oo dhammaadkeedana sidii maalin qadhaadh."

Mar kale ayuu isla cutubkan Ilaah ku leeyahay reer binu Israa'iil, "Waxaan gabayadiinna ood han, ama farxaddiinna u beddeli doonaa baroorasho." Haddaba

weli waa isla sidii oo heesaha farxad abadan ah lagama helo, waxaase laga helaa dhib iyo hawkar iyo xanuun ugu dambaysta, welibana qofka hodan kama dhigaan sida halkanba laynoogu sheegayo.

Waxaa kaloo rabbigu leeyahay, **"...maalmihiinnu waxay idiin noqon doonaan sidii baroorasho wiil madi ah loogu baroorto, oo dhammaadkeedana sidii maalin qadhaadh."** Waa dembiyadii dadkii Ilaah ku caasiyey sidii loogu jawaabay ama loogu abaal-guday. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 8aad, ayaannu idiin akhriyeynaa aayadda 11aad, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal eega, waxaa iman doona wakhti aan dalka abaar u soo diri doono, mana ahaan doonto abaar cunto la waayo ama biyo loo oomo, laakiinse waxay ahaan doontaa abaar la waayayo erayada Rabbiga."

Waxaa halkan ku qoran waxyi la yaab leh, waxaana weeye kuwa aan qaddaraninin Hadallada Ilaah in laga maanici doono ama aan loo oggolaanaynin inay helaan Hadalka Rabbiga. Waxay samaysanayaan shuruuc, iyaga ha soo saaraan ama qolo kale ha soo saartee, laakiin heli maayaan ama lahaan maayaan Hadallada Ilaaha nool ee keena badbaadada dunida. Markaa waxaa loo baahan yahay in dadku aanay liidin Hadallada Ilaah. markii laynagu wacdiyo waa inaynu si degdeg ah Hadallada Ilaah ku aqbalno.

Waxaa haddaba aad iyo aad ugu yar inta helaya Hadallada Nool ee Rabbiga, oo baranaysa kitaabka Qoduuska ah. Waxaana taas ugu wacan dhegaystayaal in dadkayagu ay gaashaanka u daruureen maqlidda Hadallada Ilaah, haddii kale kiniisado ayaa

magaalada gudaheeda inooga dhisnaan lahaa, oo innana waxaynu maalin waliba ka maqli lahayn Hadallada Ilaah waddanka gudihiisa, hadday ahaan lahayd FMyada magaalada ama dugsiyada. Dad badan ayaa diiddan in Masiixa dadka lagu wacdiyo. Waxaase Ilaah mahaddii ah inay jiraan khudbado ka socda hawada.

Waxaana maanta badbaadaya dad badan oo Soomaali ah iyadoo taasina ay ku timid danaynta dad Soomaali ah iyo weliba kuwo kale oo aan Soomaali ahayn, balse Masiixyiin ah oo doonaya in dadkayagu maqlaan Hadallada Ilaah. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 8aad ayaannu imminka horey idiinku sii wadaynaa aayadda 12aad, waxaana qoran sidatan: **"Oo waxay wareegi doonaan bad ilaa ka bad, iyo woqooyi ilaa tan iyo bari, oo waxay u ordi doonaan hore iyo dib iyagoo doondoonaaya erayga Rabbiga, oo mana ay heli doonaan innaba."**

Haddaba dadkii dhibaataadu soo gaartay ee reer binu Israa'iil waxaa lagu salladay inay dhulka warwareegaan iyago baadi-goobaya Hadallada Ilaah, balse waxaa la leeyahay, **"Ma heli doonaan."** Marka ay sidaas tahay Ilaah wuxuu siiyey dadkiisa uu jecel yahay Hadalladiisa uu u soo marinayo nebiyada, laakiin way diideen, oo welibana way silciyeen nebiyadii, oo qaar ka mid ahna way dileen. Haatan, waxaa soo degay mid ka mid ah ciqaabtii Rabbiga, waxaana weeye inuu dadkii ka aamusay. Waxaa haddaba dalkayaga markii aynu eegno ka jira abaar khusaysa Hadallada Ilaah. Waxaa aad u yar kuwa haysta kitaabka Qoduuska ah, dadkuna dooni maayaan inay macdaarada ka soo iibsadaan, waayo maba garanayaan

anfaca uu noqloshooda u leeyahay. Haddii loo sheegi lahaana dhegaysan maayaan kuwa u sheegaya. Weliba soomaalida keliya maahan ee waxaa jira dalal fara badan oo aan laga qiimaynin Hadallada Ilaah ee nool. Waxaana iyaga oodhan saaran ciqaabta Ilaah. haddaan horey idiinku sii wadn meeriska cutubak 8aad, ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 13aad, waxaana qoran sidatan:

"Oo maalintaas ayaa bikradaha qurqurxoon iyo barbaarraduba oon daraaddiis la itaal darnaan doonaan."

Waxaa Ilaah sii waxyiyaayaa, in dhallinyarada, oo ah laf-dhabarta dhaqaalaha waddan waliba, ay dhici doonaan, oo waxay u dhammaanayaan garasha la'aantooda Hadallada Ilaah. Waxaa haatan soo dhammaanaya cutubka 8aad, waxaanan idiin akhriyeynaa aayadda 14aad, waxaana qoran sidatan:

"Kuwa ku dhaarta dembiga Samaariya oo yidhaahda, Daanow, waxaan ku dhaartay ilaahaaga, oo waxaan ku dhaartay jidka Bi'ir Shebac, way dhici doonaan oo mar dambena sooma ay kici doonaan."

Waxaa kuwaas la mid ah, kuwa isku sheega inay waddaniyiin yihiin oo ku heesa heeska sida: **"Haddii aanan dalkaygow, dhuux cadaawe kuu karin, haddii aanan dhaxantiyo milicdaba u dhererayn, Soomaali kama dhalan."**

Maxaa macne ah oo ku jira in dhul lagu dhaarto, oo haddana la illoobi Ilaahii dunida uumay? Reer binu Israa'iil, waxaa imminka loo ciqaabayaa inay dhul ku dhaarteen, iyagoo weliba dembiileyaal ah.

SONG: REEL---CUT----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah

haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin